



HAY'ADDA MAAREYNTA MUSIIBOYINKA SOOMAALIYEED



**WAXQABADKA HAY'ADDA
SODMA EE LABADA SANO**

2022-2024

Hordhac	P 3
Fariinta Gudoomiyaha	P 4
1- Dhismaha Xarunta Dhexe Ee Hay'adda Sodma	P 6
2- Hawlgalinta Xarunta Qaran Ee Gurmada Deg Dega (Neoc).	P 7
Hirgalinta Xarunta Wicitaanka Ee Xaaladaha Deg Dega (Emergency Call Center)	7
Gurmada Musiibadii Qaraxii Zoobe 2 (29 Agoosto 2022)	7
Gargaakii Loo Fidiyay Dadkii Ku Waxyeeloobay Qaraxii Zoobe 2	8
Gurmadii Qarxyadii (Baladweyn, Buulo Burde Jalalaqsi, Maxaas, Baardheere Iyo Garbohaareey)	9
Gurmadii Dhibaataadii Laascanod	9
Dhismaha Xarunta Daryeelka Dhaawacyada U Baahan Gargaarka Degdega (Trauma Center)	9
Waxqabadka Hay'adda Ee Ka Hortaga Macaluusha Iyo Gaarsiinta Gargaarka Deg Deg Ah	11
Dowrka Hay'adda Sodma Ay Ka Qaadatay Deegaanadda La Xureeyay	12
Fullinta Mashaariicda U Adkaysiga Aafooyinka	12
3- Ka Digista Halis-Wadareedka Dalka	P 13
Naqshadaynta Khariidada Goobaha Fataahadaha (Flood Exposture Mapping)	13
4- Diyaarinta Daraasada Qiimeynta Waxyeeladiika Dhalatay Fataahadihii Deyrta (Rapid-Post Disaster Needs Assessment- R-Pdna)	P 14
5- Diyaarinta Istaratiijiyada Shanta Sanno Ee Hay'adda	P 16
6- Madasha Xiriirka Arriamha Bani'aadmanimada Hay'adda	P 17
7-Guulaha Hay'adda Sodma Ee Xiriirka Caalamka	P 18
8- Dhagax Dhiga Xarumaha Howlgalladda	P 19
9- Tababaridda Iyo Sare Uqaadidda Tayada Shaqaalaha Hay'adda	P 20
10-La Dagaalanka Leexsashada Gargaarka Ban'aadanimu	P 21
11- Isuduwidaha Hawlaha Bani'aadanimu Ee Ka Socda Dalka	P 22
12-Xoojinta Cilmi Baarista Maareynta Masiibooyinka	P 23

HORDHAC

Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed ee SoDMA waxaa dib loo hawl galiyay bishii Agoosto 2022 kadib markii ay soo baxday baahida loo qabo in si deg deg ah wax looga qabto xaaladaha bani'aadanimo iyo ka hortaga iyo ka jawaabista khataraha masiibooyinka dabiiciga iyo kuwa dad sameega ah.

SHAQADA AY UXILSAARAN TAHAY HAY'ADDA SODMA

Hay'addu, iyadoo fulinaysa kuna dhaqmaysa siyaasadda iyo barnaamiyada guud ee Dawladda ee ku aadan arrimaha la xiriira masiibooyinka la soo gudboonaada bulshada kuwa dabiiciga ah iyo kuwa aan dabiiciga ahaynba ee sababa khasaaro naf, maal, barakac iwm, waxay si gaar ah ugu xilsaaran tahay:

Ka hortaga iyo Udiyaargarowga khataraha Masiibooyinka

Yaraynta saameynta khataraha iyo ka jawaabista

Ka digista khataraha masiibooyinka iyo halis wadareedka.

Ka jawaabidda arimaha biniaadannimada iyo bixinta gurmada dagdag ah

Kasoo kabashada masiibooyinka, dib u dhiska iyo u adkeesiga afooyinka

Dajinta qorshayaasha iyo Horu marinta siyaasadaha maaraynta masiibooyinka

Diyaarinta shuruucda lagu maareyo masiibooyinka

Samatabixinta bulshooyinka nugul iyo fulinta xalalka waara ee dadka tabaalaysan.

Isuduwidda iyo kormeerka hawlaha gargaarka bani'aadanimo iyo xaaladaha gurmada deg deg ah.



FARIINTA GUDOOMIYAHA



Ugu horeyn, Mahadnaq dhamaanteed waxay u sugnaatay Allah Subxanahu Watacalaa, oo wax walbaahi doonistiisa ku qabsoomaan. Marka xigta waxaan u mahadcelinayaa Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliyeed Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, iyo Raysulwasaaraha Xukumadda Jamhuuriyadda Federaalka Somaliyeed Mudane Xamsa Cabdi Barre oo la yimid aragtibisi loo ku aadan xoojinta hawlaha gargaarka bani'aadanimo ee dalka, taasoo ay ka dhalatay in ay dib u hawlgaliyaan Agoosto 16, 2022 Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA).

Dib u hawlgalinta Hay'adda ayaa timid xilli ay umadda Soomaaliyeed la tacaalaysay dhibaatooyin kala duwan oo ay sababeen; Abaarta soo noqnototay, fatahaadaha, anyaxa saxaraha iyo dabeello ku dhufatay qaar kamid deeganada Soomaaliyeed, ayna usii dheerayd xasillooni darro amni iyo qaraxyo oo ay soo abaabulayeen kooxaha xagjirka ah ee Khawaarijta Al shabaab.

Waxaa kale oo ay kusoo beegantay waqti laga cabsi qabay inay dalka ka dhacdo macaluulka dib abaartiisaf marka ahayd oo soo bilaabtay dhamaadkii sanadka 2021, taasoo saameysay tiro gaaraysa ku dhawaad 7.8 Malyan qof oo kamid ah bulshada Soomaaliyeed iyo malaayiin xoollaha ay ku tiirsanyihiin, taasoo ay ka dhasheen barakac baahsan oo gaaraya ilaa 1 Mllion qof. Hasayeeshee, islamarkii dib loo hawlgaliyay Hay'addu waxay bilowday gurmd deg dega in la gaarsiiyo dadkii Soomaaliyeed ee kaalmada bani'aadanimo sida degf dega ugu baahnaa, waxaana dadaal baaxad leh kadib la gaarsiiyay gargaar bani'aadanimo ilaa 85% deegaanada iyo dadka ay saamaysay abaarta taasoo sabab u noqotay in laga baaqsado xaaladii macaluusha ee laga cabsi qabay.

Sidoo kale waxaan gargaar bani'adamno gaarsiinay in ka badan 20 deegaan oo kamid ah deegaanadii laga xoreeyay argagaxisada khawaarijta.

ayadoo sidoo kale aanu gurmad iyo gargaar deg deg ah u fudinay dhamaan dhaacawcyadii ka dhashay qaraxyadii ay soo abaabulayn khawaarijta AL-shabab ee ka dhacay gobolka Benadir iyo qaar ka mid ah dowlad goboleedyada, anaga oo sidoo kale kaalmo wax ku ool ah gaarsiinay eheladii iyo qoyskii marxuumiintii ku dhintay qaraxyadaas, gaar ahaan qaraxii zoobe2, ee October 29, 2022.

waxaana ka shaqaynay inaan dalka dibaddiisa u qaadnay dhawacyada halista ah ee aan lagu daawayn karin wadanka gudihiisa.

Intaani iyo in kabadanba, waxaay kuhirgashay tawfiqda Alle iyo dadaalka Dawladda oo kaashanaysa dawladdaha aan walaalaha nahay iyo kuwa aan saaxiibada nahay. Waxaa kaloo kaalin weyn ka qaatay shaqaalaha, howlwadeenada, mutadawiciinta iyo khubarada Hay'adda SoDMA oo habeen iyo maalin u taagan gudashada waajibbaadka qaran ee naloo loo igamday iyadoo ay naga go'antahay inaan si hagar la'aan ah u oofino xilka naga saaran sare uqaaddida iyo dardargelinta



hawlaha maareynta masiibooyinya iyo gargaarka Bani'aadamnimada ee dalka anagoo diiradda saarayna sidii looga gudbi lahaa u unuglaanshaha khatarah loona adkayn lahaa soo kabashada iyo in la gaaro heerarka nolosha ee u adkaysiga afooyinka .

Gabagabadii, waxaan u mahadcelinaya dhamaan Shacabka Soomliyeed ee gudaha iyo dibada jooga, Dowladda Fderalka, Dowlad Goboleedyada, iyo hay'adaha kala duwan ee caalimiga ah iyo kuwa wadaniga ah ee nagu gacansiiyay gudashada waajibaadkeena qaran.

Mahadsanidiin

Mudane: Maxamuud Macalin Cabdullahi

Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed ee SoDMA



1

DHISMAHA XARUNTA DHEXE EE HAY'ADDA SODMA

Kadib markii dib loo hawlgaliyay Hay'adda waxay muddo gaaban ku hirgalisay dhismaha dhismaha iyo qalabaynta xarunta dhexe ee ay ku shaqayso hay'adda SoDMA, taasoo loo dhisay si heer sare ah laguna qalabeeyay dhamaan agabka lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka shaqo ee hay'adda. waxaana u mahad celinaynaa hay'adda UNDP oo ka kaalmaysay hay'adda Waxaa kaloo mahad balaadhan u celinaynaa hay'adda UNICEF oo kaalin laxaad leh ka qaadatay qalabaynta xarunta.

Sanadguuradii dib uhawlgalinta hay'adda oo ku beegnayd 16/8/2023 ayaa waxaa xarunta dhexe xadhiga ka jaray Raysulwasaare kuxigeenka XFS Mudane Saalax Jaamac.



2

HAWLGALINTA XARUNTA QARAN EE GURMADKA DEG DEGA (NEOC).

Si loo maareeyo xaaladaha degdega ah, loona badbaadiyo naf iyo maalka bulshada soomaaliyeed, waxay Hay'adda Maareeynta Masiibooyinka qalabaysay islamarkaana hawlgalisay Xarunta Qaran ee Hawlgalladda Gurmada Deg dega (National Emergency Operation Center). Xarunta ayaa diyaar u ah fidinta adeegyada gurmada deg dega ee dalka.



HIRGALINTA XARUNTA WICITAANKA EE XAALADHA DEG DEGA (EMERGENCY CALL CENTER)



GURMADKA MUSIIBADII QARAXII ZOUBE 2 (29 AGOOSTO 2022)

Hay'adda Mareeynta Masiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA) waxa ay sameeysay dadaallo balaaran oo gurmada loogu fidiyay dadkii ku wax yeelobay qaraxii zoobe 2, iyadoo hay'addu ay si dag dag ah u diyaarisay xarumo ku meelgaar ah loogu fududeeyay muwaadiniinta soomaaliyeed ee dhiigooda ugu deeqay walaalahood dhibaataadu saameeysay iyada oo u gurmatay dadkii ku waxyeelobay iyo ehaladooda.



Hay'addu waxay ku guuleysatay abaabulka bulshada soomaaliyeed iyada oo aruurisay dhaqaalihii loogu gurmaday dadkii ku waxyeeleobay qaraxii Zoobe2.

Dhaqaalihii la soo uruuriyay waxeey hey'addu gaarsiiyay agoontii iyo eheladdi dadkii ku dhintay, kuwii ku dhaawacmay iyo muwaadiniintii hantidooda ku burburtay qaraxii Zoobe2. Halka dhaqaalihii soo haray lagu dhisayo dhismaha xarunta Xarunta Daryeelka Dhaawacyada u baahan gargaarka degdega (Trauma Center) taasoo uu horay u dhagax dhigay Raysulwasaaraha XFS Mudane Xamsa Cabdi Barre lagana dhisayo isbitaal Madiina.

GARGAAKII LOO FIDIYAY DADKII KU WAXYEEOBAY QARAXII ZOUBE 2

QOYSASKII WAXYEELADA SOO GAARTAY EE LA CAAWIYAY

DHAAWACYADA	WADARTA DHAAWACYADA	WADARTA DHAAWACYADA CULUS EE LACAGAHA LA SIIYAY	QOFKIIBA	WADARTA QOYSASKA LA CAAWIYAY
WADARTA DHAAWACYADA	334	28	\$500	28
DHAAWACYADA CULUS EE DIBADA LOO QAADAY	11	9	\$2000	9

DHIMASHO	WADARTA GUUD EE DHIMASHADA	WADARTA DHIMASHADA EE LACAGAHA LA SIIYAY	QOFKIIBA	WADARTA QOYSASKA LA CAAWIYAY
WADARTA DHIMASHADA	119	113	\$1000	113

AGOONTA WAX LA GAARSIYAY



GANACSATADA WAX LA GAARSIYAY



GURMADKII QARXYADII (BALADWEYN, BUULO BURDE JALALAQSI, MAXAAS, BAARDHEERE IYO GARBOHAAREY)

Hay'adda Mareeynta Musiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA) waxay sameysay gurmada balaaran oo lagu soo qaaday dhaawacyada qaraxyadii Baladweyn, Buulo burde, Jalalaqsi, Maxaas iyo Baardheere.

NO	MAGAALADA	TIRADA BUKAANADA
1	Baladweyne	21
2	Maxaas	32
3	Buulaburde	7
4	Jalalaqsi	7
5	Garbaharey	10
6	Baardheere	13
WADARTA GUUD		90 BUKAAN

GURMADKII DHIBAATADII LAASCANOD

Hay'adda Mareeynta Musiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA) waxay gurmada degdeg u fidsay dadkii ku wax yeeloobay dhibaatadii laascaanood iyada oo hey'addu si dag dag ah u dirtay diyaaraddo lagu soo qaaday dhaawacyadii, sidookale waxay dirtay shixnado gargaar oo lagu qaaday diyaarado iyo Doon.

NO	NUUCA GAR GAAR	TIRADA GUUD
1	Soo qaadidda Dhaawacyadda	185 dhaawac
2	Dawooyin	21 TAN



DHISMAHA XARUNTA DARYEELKA DHAAWACYADA U BAAHAN GARGAARKA DEGDEGA (TRAUMA CENTER)


Si daryeel wanaagsan ay u helaan bukaanadda ku waxyeelooba musiiibooyinka, loona badbaadiyo naftooda, waxay Hay'adda Maareeynta Musiibooyinka ku guuleeysatay dhagax dhiga dhismaha Xarunta ugu weyn Daryeelka Dhaawacyada u baahan gargaarka degdega iyada oo uu horay u dhagax dhigay Raii'sulwasaaraha XFS Mudane Xamza Cabdi Barre.





WAXQABADKA HAY'ADDA EE KA HORTAGA MACALUUSHA IYO GAARSIINTA GARGAARKA DEG DEG AH

Kadib roobabkii yaraaday afar xilli roobaad oo isxigay waxay sababtay abaar daran taasoo saamaysay in ka badan **7.8 Malyan** oo qof iyo malaayiin xoola ah, taasoo horseeday barakac baahsan oo gaarayo ilaa **1 Malyan qof**. Hay'addu waxay gurmada balaaran gaarsiisay deegaanadii ay abaartu saameysay. Waxayna hay'adu ku guuleeysatay fulinta gurmada balaaran oo door weyn ka qaatay in laga hortago halistii macluusha ee dalku qaraka u saaraa. Sidoo kale Hay'adu waxay gurmada degdega ah gaarsiisay deegaanadii ay saameysay fatahaadaha gu'ga 2022 iyo deyrta Elnino 2023.



DOWRKA HAY'ADDA SoDMA AY KA QAADATAY DEEGAANADDA LA XUREEYAY

Hay'addu waxay kaalin mug leh ka qaadatay barnaamijka xasilinta iyada oo gargaarka bani'adamno gaarsiisay in ka badan 20 deegaan oo kamid ah goobihii laga xoreeyay Khawaarijta ee dowlad gobaleedyadda (Hirshabeelle, Jubbaland iyo Galmudug) iyada oo la gaarsiiyay gargaar dad dhan **211,344 oo qof**.



FULLINTA MASHAARIICDA U ADKEYSIGA AAFOOYINKA

Tan iyo markii Hay'adda SoDMA la howlgaliyay, waxa ay sidoo kale diiradda saartay fullinta mashaariicda u adkeysiga aafuoyinka, ayada oo ku guulaysatay in ay hesho taakulayn ceelal riig ah oo gaaraya ilaa **73 ceel**, kuwaas oo loogu talagalay dadka abaarta saamaysay.

Ceelashaan ayaa qeyb ka ah taageerada ay Dowladda Soomaaliya ka heshay dowladaha kala ah ; Boqortooyada Sacuudiga iyo Dowladda iskutagga Imaaraadka Carabta. Ilaa hadda waxaa la bilaabay qodidda **23 ceel oo kamid ah ceelashaan**.





Sida ku cad waajibaadka hey'adda ee ka digista halisyadda iyo xaaladaha khatarta ah waxay si Maalinle, Asbuucle iyo Bille u aruurisaa warbixinada xaaladaha khatarta ah ee wadanka ka jira, waxayna sidoo kale odoros kabixisaa khataraha kusoo fool leh, iyadoo islamarkaana isha ku haysaa khatarta markaas taagan. Haddaba, Hay'addu waxa ay soo saartay digniino kala duwan oo ku saabsan; Fatahaad, Abaar, Hirarka Badda iyo Dabeylo xoogan oo ku soo wajahnaa deegaano badan oo wadanka ka mid ah, digniinahaas oo u sahashay bulshada in ay xili fican ku baraarugaan kana digtoonadaan, taasoo yareysay qasaaraha ka dhalankaray oo isku jiray naf iyo maal.



NAQSHADAYNTA KHARIIDADA GOBAHA FATAAHADAHA (FLOOD EXPOSTURE MAPPING)

Hay'adda SoDMA waxay diyaarisay hab casri ah oo lagaga hortagi karo saamaynta fatahaadaha kusoo noqnoqda magaalooyinka Baladweyne iyo Jowhar, habkan ayaa ah naqshadaynta khariidada labada magaalo oo lagu cadyanayo meelaha u nugul fatahaafa iyo sida looga gaashaman karo. Waxaanna qorshayhsan in nidaamkan laga wada hirgaliyo magaalooyinka u nugul fatahaadaha wabiyada Shabeelle iyo Jubba.




4

DIYAARINTA DARAASADA QIIMEYNTA WAXYEELADIKA DHALATAY FATAAHADIHII DEYRTA (RAPID-POST DISASTER NEEDS ASSESSMENT- R-PDNA)

Roobabakii Deyrta ee 2023 ee ay weheliyeen xaladda cimilada **ElNiño** Rayaa sababtay daadad iyo fatahaado aad uga biyo badan sida caadiga ahayd. Xaaladan ayaa saaameyn ku yeelatay ilaa 2.5 Million ruux halka ay ku barakaceen in kabadan 1.1 million ruux iyadoo saamaynta ka dhacday 36 dagmo, roobabkaan ayaa waxaa ku geeriyootay ilaa 118 ruux.

Kadib masiibadii El-Nino, Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka (SoDMA) ayaa ka codsatay hay'adaha kala ah Bangiga Aduunka, Midowga Yurub iyo Qaramada Midoobay in laqiimeeyo waxyeeladii fatahaadaha El-Nino 2023. Wadatashi farsamo kadib waxaa lagu heshiiyay in la laga qabto qiimaynta 16 ka dagmo ee ugu saamaynta badneed xaaladdii El-nino iyadoo qiimaynta lagu suubinayo ilaa 10 waaxood (sectors) sida ku cad shaxda hoose.

Ugudanbeentii, howsha hortabinta ugu muhiisan leh ayaa ah in loohelo qorshayaan iyo dhaqaale lagu fuliyo talooyinka warbixinta guud ay bixineeso isla markaana loo helo bulshooyin disan una adkesan kara khatarada ka dhaca deegaanadooda.



QAYBTA	SAAMAYNTA (US \$)			BAAHIYAHA (US \$)
		Khasaare	Wadarta saamaynta	Wadarta Baahiyaha guud
QAYBAHA BULSHADA				
Guriyeynt	\$ 7,917,169.00	\$ 1,443,695.00	\$ 9,360,864.00	\$ 27,048,181.17
Waxbarashada	\$ 18,913,700.00	\$ 2,100,000.00	\$ 21,013,700.00	\$ 23,057,783.00
Caafimaadka	\$ 7,545,000.00	\$ 9,825,000.00	\$17,370,000.00	\$19,551,750.00
WADARTA QAYBAHA BULSHADA	\$ 34,375,869.00	\$ 13,368,695.00	\$ 47,744,564.00	\$ 69,657,714.17

QAYBAHA WAX SOOSAARKA	SAAMAYNTA (US \$)			BAAHIYAHA (US \$)
	Waxyeeelo	Khasaare	Wadarta saamaynta	Wadarta Baahiyaha guud
Beeraha iyo Xoolaha	\$ 38,966,108.61	\$ 17,995,472.07	\$ 56,961,580.67	\$ 60,018,390.30
Wadarta Qaybaha wax soosaarka	\$ 38,966,108.61	\$ 17,995,472.07	\$ 56,961,580.67	\$ 60,018,390.30

QAYBAHA KAABAYAASHA DHAQAALAHA	SAAMAYNTA (US \$)			BAAHIYAHA (US \$)
	Waxyeeelo	Khasaare	Wadarta saamaynta	Wadarta Baahiyaha guud
Biyaha	\$ 16,366,262.00	\$ 16,307,278.00	\$ 2,673,540.00	\$ 24,662,057.52
Tamarta	\$ 9,327,571.00	\$ 1,953,842.00	\$ 11,281,413.00	\$ 14,056,707.00
Gaadiidka	\$ 29,709,363.45		\$ 29,709,363.45	\$ 37,399,016.00
WADARTA QAYBAHA KAABAYAASHA DHAQAALAHA	\$ 55,403,196.45	\$ 18,261,120.00	\$ 73,664,316.45	\$ 76,117,780.52

CROSS-CUTTING SECTORS	SAAMAYNTA (US \$)			BAAHIYAHA (US \$)
	Waxyeeelo	Khasaare	Wadarta saamaynta	Wadarta Baahiyaha guud
Yaraynta Khatarta Masiibada iyo u-adkeysiga	\$ 234,865.00	\$ 2,300,180.83	\$ 2,535,045.83	\$ 8,572,503.75
Ilaalinta Bulshada iyo Shaqada/Nolol-maalmeedka	\$ -	\$ -	\$ -	\$ 17,102,255.00
Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada	\$ 5,151,800.37	\$ 7,372,349.57	\$ 12,524,149.94	\$ 18,693,675.64
CROSS-CUTTING SECTORS TOTAL	\$ 5,386,665.37	\$ 9,672,530.40	\$ 15,059,195.77	\$ 44,368,434.39
WADARTA GUUD	\$ 134,131,839.43	\$ 59,297,817.47	\$ 193,429,656.89	\$ 250,162,319.38



5

DIYAARINTA ISTARATIJIYADA SHANTA SANNO EE HAY'ADDA

Hay'adda waxa ay diyaarisay istraatiijo 5 sano ah oo ay ugu talo gashay ka qayb qaadashada yaranta khataraha Musiibooyinka%50 Mudada shanta sano ah ee soo socota (2024–2028).

Istaraatiijiyadu waxay xoogga saaraysa qorshaha 5 ta sano ee soosocota waxay xooga saaraysaa mashaariicda la xiriirta

- U ADKAYSIGA AAFOOYINKA IYO MASIIBOYINKA
- U DIYAAR GAROWGA IYO KA HORTAGA MASIIBOYINKA
- KA JAWAABISTA MARKAY DHACDO MASIIBO
- MASHAARIICDA DIB USOO KABASHADA

Istiraatiijidaan waxa ay laf dhabar u tahay hanaanka maareeynta musiibooyinka iyo badqabka bulshada soomaaliyeed waxaana qeyb ka ah Wasaaradaha Gargaarka iyo Maareeynta Masiibooyinka ee Dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir.



waxa ay guuleysatay in ay qabato shirka Madasha xiriirka Arrimaha Bani'aadamnimda kaasoo ah shir ay iskugu yimaadaan Hay'adda SoDMA, wasaaradaha qeyb kamid ah xukuumadda federalka, Wasaaradaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee dowlad Goboleedyada, Gobolka Banadir, Deeq bixiyaasha, Hay'adaha Caalmiga ah iyo kuwa dalka, shirkaan oo looga arrin sado hadba xaaladdaha bani'aadamnimo ee taagan ayaa sedexdii biloodle ah. Waxayna hay'addu qabatay muddada sanadka ah oo ay shaqaynaysa sedex jeer oo laba kamid ah lagu qabtay Caasimadda Muqdisho uuna shir gudoomiyay Raisulwasaare kuxgeenka XFS Mudane Saalax Axmed Jaamac halka midka sedexaadna lagu qabtay Magaalada kismaayo kaas oo Shir gudoomiyay Madaxwaynaha dowlad gobolled Jubbaland Mudane Axmed Maxamed Islaam. Shirarkan ayaa diiradda lagu saaraa sidii looga jawaabi lahaa Abaaraha, fatahaadaha iyo u gurmashada dadka ku nool deegaanada laga xoreeyay Khawaarijta iyo kuwa kasoo barakacay. sidoo kale waxaa looga wada hadlay guud ahaan la tacaalidda xaaladaha bani'aadamnimo ee ka jirta dalka, iyo sidii loo abuuri lahaa qorshayaal keeni kara in laga gudbo marxaladaha u nuglaanshaha masiibooyinka islamarkaana la gaaro heerka u adkaysiga iyo horumarinta nololaha bulshada.



7

GUULAHA HAY'ADDA SODMA EE XIRIIRKA CAALAMKA

- Hay'addu waxay qabatay Shir gudoonka Golaha Guud ee Hay'adda AFRICAN RISK CAPACITY
- Hay'adda SoDMA waxay haddan Xubin Board ka ku leedahay AFRICAN RISK CAPACITY oo ay ku matalayso wadamada Bariga Africa
- Hay'adda SoDMA waxay Soomaaliya u matashaa EARLY WARNING FOR ALL ee ay hogaamiso UNDRR.
- Hay'adda SoDMA waxay hormuud uga tahay Soomaaliya arrimaha la xiriira DISASTER RISK FININCING. Ee ay maalgaliyaan World Bank iyo African Development Bank.
- Hay'adda SODMA waxay si fiican uga muuqataa fagaarayaasha aduunka iyo shirarka heer caalami ee ku saabsan arrimaha Maareynta Masiibooyinka.



8

DHAGAX DHIGA XARUMAHA HOWLGALLADDA

Gurmadka DegDega ee Dowlad goboleedyada. Iyada oo laga duulayo maareeynta xaaladaha degdega ah waxay Hay'adda Maareeynta Musiibooyinka (SoDMA)

dhagax dhigtay dhamaan Xarumaha Howlgalladda Gurmadka DegDega ah ee Dowlad goboleedyada dalka.



Dowlad goboleedka Koonfur Galbeed



Dowlad goboleedka Hirshabelle



Dowlad goboleedka Galmudug



Dowlad goboleedka Jubaland



Dowlad goboleedka Puntland

Hay'addu waxay xooga saartay tababaridda iyo sare u qaadidda xirfadda shaqo iyo khibradda aqooneed ee shaqaalaha hay'adda, waxaana muddadii halka sano ahayd oo ay hay'adda shaqaynasay shaqaalaha loo qabtay 12 (labo iyo taban) tababar iyo aqoon isweydaarsi oo ay ka faa'iideystay 259 qof oo ka tirsan shaqaalaha Hay'adda, kuwaas oo lagu baranayay mawaadiic kala duwan oo la xiriira:


- Isku xirka iyo iskudubaridka Arrimaha baniaadamanimda Hanaanka yareynta khataraha iyo maareynta Masiibooyinka
- Ka jawaabista iyo gurmada degdega ah
- U adkeysiga afooyinka iyo kasookaba
- shada dhibaatooyinka.
- Qiimaynta baahiyaha bulshada nugul.
- Falanqaynta xogaha abaaraha iyo sugnaanta cuntada.
- Ka qaybqaadashada haweenka hogaan
- ka-maamul ee ka jawaabista xaaladaha Bani'aadamnimo
- Ka digista halis-wadareedyada.
- Daraasadaha la xidhiidha isbedelka cimilada iyo samaynta ay ku leeyihiin masiibooyinka
- Dabalgalka iyo qiimeynta mashaariicda iyo mawadiic kale oo fara badan.



- Magacaabista lataliye sare ee ka hortaga lexsashada gargaarka
- Samaynta unit hay'adda u qaabilsan hawshaas
- Diyaarinta shuruuc iyo siyaasado khuseeya ka hortaga lexsashada gargaarka
- Abaabulka hay'adaha gargaarka iyo wacyigalinta bulshada



- Shirarka heer qaran ee lagaga tashado hawlaha bani'aadanimo
- La socodka shaqooyinka hay'adaha ka shaqeeya hawlaha ban'aadanimo
- Wadatshi joogta ah oo aan la yeelano madxada UN ka sidii looga gudbi lahaa ku tiirsanaanta gargaarka bani'aadanimo



- Hay'adda SODMA waxay heshiisyo la gashay jaamacado si xal cilmiyaysan looga gaaro maareynta masiibooyinka
- Qabashada Shirka Cilmi Barista ee bulsha adkaysi u leh masiibooyinka





449
CALL CENTER



www sodma gov so
communications@sodma.gov.so



@SoDMA